



Warbixin muhiim ah oo afkaada ku qoran

[Belangrijke informatie in je eigen taal]

Haddii aad Nederland ku cusub tahay, wax badan ayaad aqoon u lahayn wejiyo badana leh. Inta aadan afka Nederland-ka aad awood ku lahayn, waa ay adag tahay sida aad warbixinta sax ah ku hanan lahayd. Iyada oo lagaa rabo in aad arrimo muhiim ah aad fuliso. Website-kan waxa aad ka heleysaa warbixin qaxootiga macno weyn u leh oo afkaada ku qoran.

VluchtelingenWerk waa lala soo xiriiri karaa inta 'gurmada-korona' socdo

[VluchtelingenWerk blijft bereikbaar in 'corona-crisis']

Adeeg fidinta VluchtelingenWerk waa mid soconaaya wakhtiga lagu jiro 'gurmada-korona'. Qoxootiga waa ay ku tashan karaan caawinaadenna muddaan aan deggeganeeyn. Waa ka hawl galeynaa su'aalaha deg degga ah. Balse wakhtiyada soo socda taasi si kale ayaan u qabaneynaa. Su'aalo badan telefoonka ama emailka ama whatsappka ayaan uga jawaabi karnaa. Haddii taasi aysan macquul ahayn, waxa uu horjoogaha kooxda VluchtelingenWerk go'aamin karaa in ballan xafiiskenna laguugu qabto.

Hadaba: soo wactan ama mailka ku soo dir su'aashaada. Ka eeg nambarka telefookenna ama ciwaanka emailka poster-ka ku dheggaan xafiiskenna. Ama ka eego boggaan safka gudban ee midigta (laptop-ka) ama hoos (smartphone-ka) kuna qor barka cad rugta degaankaada.

Duruusta la qabsashada bulshada ee VluchtelingenWerk waa la joojiyay usbuucyada soo socda. Iskuullada waddanka oo dhan waa la wada xiray. Waxa aan baadi goobeynaa hab aan duruusta online ugu bixinno, adeegsiga 'meel fog wax ka baro'. Waxaa xigi taasi si dhaqsi leh warbixin dheeraad ah. Dadka corsoyaasha qaata waxay macallinka ka helayaan hagis sida online wax loogu barto.

Su'aalaha : kala xiriir macallinkaada, ama horjoogaha kooxda ee xaruunta waxbarashadaada.

Warbixin dheerad ah oo korona ku saabsan : ka eeg pharos.nl/coronavirus/

[Asielprocedure]

[Akhri guud ahaan sida tixanaha geedi socodka magngelyo aay Nederland uga shaqeyso, xagee ayaad joogeysaa yaadna la kulmi doontaa.](#)

Isku keenista qooyka

[Gezinshereniging]

[Xujjooyinkee lagaa rabaa in aad ka soo baxdo haddii aad rabto in adiga iyo xubnaha qooykaada la'isku kiin keeno?](#)

Guri dejjinta

[Huisvesting]

[Akhri wax kasta oo lagaa rabo in aad soo dhammeystirto marka guri lagu siiyo oo aad degeyso degmo.](#)

Daryeelka caafimaad

[Gezondheidszorg]

[Warbixin ku saabsan ceymiska daryeel oo qasabka ah, qeybta aad kharashka ka bixineyso, gunnada daryeelka, dhakhtarka qooyka, daryeelka taqassuska ah iyo dheeraad.](#)

Daqli iyo shaqo

[Werk & inkomen]

[Sidee ayaad Nederland shaqo uga heli kartaa? Sidee lacag ku heli kartaa adiga oo aan weli shaqo helin?](#)

La qabsashada bulshada

[Inburgeren]

[Akhri dheeraad ku saabsan waxyaabaha ay dowladda Nederland qasab ka dhigtay oo la xiriira la jaan qaadka bulshada oo dadka ku cusub waddanka la dul saaray.](#)

Waxbarashada

[Onderwijs]

[Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha gudaha habka waxbarasho ee Nederland oo magangelyo doonka iyo qaxootiga.](#)

Haddii magangelyo lagu siin waayo

[Als je geen asiel krijgt]

[Akhri dheeraad ku saabsan fursdaha aad heysato haddii codsigaada magangelyo la soo diido.](#)

Warbixin ku saabsan carruurta

[Informatie voor kinderen]

Ma ka da' yartahay 18 sano jir mase dooneysa warbixin ku saabsan iskuul, ku noolaashada xaruunta magangelyo doonka ama dhaqanka Nederland-ka? Telefoonka Carruurta iyo Hey'adda u Adeegta qaxootiga waxa ay hayaan website u gaar ah carruurta qaxootiga ah. Tag : www.tell-me.nl

Ku saabsan Hey'adda u Adeegta Qaxootiga

[Over VluchtelingenWerk]

Hey'adda u Adeegta Qaxootiga Nederland waa urur madax bannaan oo u hawl gala danaha qaxootiga iyo magangelyo doonka Nederland. Shaqaalahenna iyo tabarruceyaal tiro badan ayaa ku hawlan difaaca magangelyo doonka iyo qaxootiga iyaga oo si shaqsi ah u garab gala iyo iyaga oo danahooda ka hawl gala marka la oggolaado, dejjinta soo dhoweyn iyo ka qeyb noqoshada bulshada. Shaqadenna waxa ay ku saleysan tahay Caddeynta Caalamiga ee Xuquuqda Bani'aadamka.

Ka faaleyn website-kan?

[Feedback op deze website?]

Website-kan waxaa si taxadder leh iskuugu duba riday Hey'adda u Adeegta Qaxootiga Nederland. Haddii aad qalad ku aragto, nagu soo ogeysii afka Nederland-ka ama Ingriiska adeegso forrefugees@vluchtelingenwerk.nl.